GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND
SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES







# Warbixinta Shir-gudoonka ee

## Wax-qabadka Kal-fadhigii 10aad ee Golaha Wakiillada

(24 Nov 2024~29 Jan 2025)

# ARRAAR

*Mudanayaal.*

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhigan 11aad ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhiyadii hore oo aanu Goluhu Shaqooyin badan qaban, isla markaana ajandaha kal-fadhigii hore aynaan dhamaystirin.

Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena iyo hawlaha faraha badan ee inoo qorshaysan kal-fadhigan, waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadka kal-fadhigii ee 10aad iyo wixii kale ee hawlo ah ama dhacdooyin ahaa ee mudaddii fasaxa ee ka dambeysay kal-fadhiyadaas.

# TUSMADA WARBIXINTA


**HORDHAC** ........ 3

**WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 10AAD** ........ 4

**Warbixinadii Golewaynaha laga hor Jeediyay Sannadkii 2024kii** ........ 4

**Xeerarka Goluhu Ansixiyay** ........ 5

**Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay** ........ 5

**Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2025ka** ........ 7

**Ansixinta Xisaab Xidhka Miisaaniyada Sannadkii 2022kii.** ........ 8

**Mashaariicda Sharci (Xeerar) ee Golaha horyaala** ........ 9

**GO'AAMADII GOLUHU GAADHAY** ........ 10

**WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA 2024KII** ........ 12

Gudidda Joogtada iyo Anshaxa ........ 13

Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta ........ 13

Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka ........ 14

Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka ........ 15

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ........ 16

Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska. ........ 16

Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada ........ 17

Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca ........ 17

Gudidda Arrimaha Bulshada ........ 18

**AQOON-KORODHSIYADII IYO TABABARADII** ........ 20

**KULAMO WUFUUDAHA IYO MADAXDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH** ........ 20

**SAFARADII DIBADA LOO BAXAY** ........ 20

## HORDHAC

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5$^{aad}$ (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1$^{aad}$ ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39$^{aad}$, Qodobka 53$^{aad}$, Qodobka 54$^{aad}$ iyo Qodobka 55$^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu yeeshay kal-fadhigii 10$^{aad}$ mudaddii u dhexaysay **24 Nov 2024 illaa 03 June 2025** oo fasax laba bilood ahi u dhexeeyay. Hadaba warbixintan waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee kal-fadhigii 10$^{aad}$ iyo mudaddii fasaxa ee ka dambeysay wixii uu qabtay.

# WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 10^AAD

***Wax-qabadkA Kal-fadhigii 10^aad ee Golaha Wakiillada***

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Fadhiyadii Golaweynaha ee *Kal-fadhigii 10^aad* | 14 Fadhi |
| 2. | Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn | 13Kulan |
| 3. | *Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada* | *27 Fadhi/kulan* |

## Warbixinadii Golewaynaha laga hor Jeediyay Sannadkii 2024kii

Waxa Kal-fadhigii ee 10^aad Golaha laga horjeediyay 9 Warbixinood oo isugu jiray Warbiixnada Gudiyada, Warbixinada Xeerarka, Mooshino, Miisaaniyado, Xisaab Xidho iyo kuwa Masuuliyiin Qaran ay Golaha ka jeediyeen. Shaxdan hoose waxay muujinaysaa Nooca Warbixinta Golaha laga jeediyay, taariikhda la jeediyay iyo cidda jeedisay.

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| 30 November 2024 | Warbixint Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda ee Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah (Cybersecurity & Cybercrime Act) | Dr Axmed Yuusuf Idis<br><br>Wasiirka W. Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda |
| 1 December 2024 | Warbixint Gudidda Hawlaha Guud, Guryaynta iyo Tiknoolojiyada ee Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah (Cybersecurity & Cybercrime Act) | Md. Axmed Cabdi Ibraahim Gudoomiyaha Gudidda |
| 09 December 2024 | Waxa Golaha Warbixin iyo Tallooyin ku saabsan Qabyo-qoraalka Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah (Cybersecurity & Cybercrime Act) siiyay khabiis Maxamed Xasan Cawaale | Md, Maxamed Xasan Cawaale Khabiir Xogaha iyo arrimaha Tiknoolojiyada ah. |
| 09 December 2024 | Warbixint Wasiirka Wasaarada Wasiirka W. Warfaafinta ee Xeerka Saxaafada Somaliladn. | Md. Cali Xasan Maxamed<br><br>Wasiirka W. Warfaafinta |
| 28 December 2024 | Waxa Golaha Warbixin iyo Tallooyin ku saabsan Qabyo-qoraalka Xeerka Illaalinta Xogta Elektarooniga ah (Data Protection Bill) siiyay khabiis Maxamed Xasan Cawaale | Md, Maxamed Xasan Cawaale Khabiir Xogaha iyo arrimaha Tiknoolojiyada ah. |

| | | |
|---|---|---|
| 11 January 2025 | Warbixinta Gudiga Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Xisaab Xidhka Miisaaniyad sannadeedkii 2022kii | Gudoomiyaha Gudidda Md. Maxamed Jaamac Liibaan |
| 19 January 2025 | Warbixinta Wasaarada Maaliyada ee Odoroska Miisaaniyada Sannadka 2025ka | Md. C/laahi Xasan Aadam Wasiirka W. Maaliyada |
| 20 January 2025 | Warbixinta Xeer-ilaaliyaga Guud ee Wax ka badelka Xeerka Ciqaabta Guud. | Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka Md. C/raxman Jaamac Hayaan |

## Xeerarka Goluhu Ansixiyay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | U gudbay | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada. | Madaxweynaha | 21/12/2024 |
| 2. | Xeerka Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda | Madaxweynaha | 22/12/2024 |

## Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay

| N | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | C/raxmaan Cismaan Cabdulle | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 07/12/ 2024 |
| 2. | Siciid Axmad C/kariim | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 07/12/ 2024 |
| 3. | Md. Axmad Yaasiin Sh. Cali Ayaanle | Wasiirka W. Warfaafinta iyo Wacyigalinta | 06/01/2025 |
| 4. | Md. Cabdiraxaam Daahir Aadan | Wasirka Wasaaradda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah | 06/01/2025 |
| 5. | Md. Maxamed Yuusuf Cali (Ikacase) | Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga iyo Difaaca | 06/01/2025 |
| 6. | Md. Khadar Xuseen Cabdi | Wasiirka Wasaarada Madaxtooyada | 06/01/2025 |
| 7. | Md. Ismaaciil Yuusuf Ducaale | Wasiirka Wasaarada Waxbarashada, Barbaarinta iyo Sayniska | 06/01/2025 |
| 8. | Dr Xuseen Bashiir Xirsi | Wasiirka Wasaarada Horumarinta Caafimaadka | 06/01/2025 |
| 9. | Mrwo. Milgo Maxamed Cilmi | Wasiirka Wasaarada Arrimaha Bulshada iyo Qoyska | 06/01/2025 |
| 10. | Md. Axmed Maxamed Faarax Coofle | Wasiirka Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha | 06/01/2025 |
| 11. | Md. Jamaal Maxamed Jaamac | Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyada | 06/01/2025 |
| 12. | Md. Cismaan Ibraahin (Af-gaab) | Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo horumarinta | 06/01/2025 |
| 13. | Mrwo Kaltuun Sh. Xassan Cabdi Madar | Wasiirka Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka | 06/01/2025 |
| 14. | Md. Siciid Maxamed Buraale | Wasiirka Wasaarada Maalgashiga iyo Warshadaha | 06/01/2025 |
| 15. | Md. Cabdilaahi Cismaan Jaamac (Geeljire) | Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo Isbadelka Cimilada | 06/01/2025 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 16. | Md. Cabdilaahi Xassan Aadan Cawaale | Wasiirka Wasaarada Maaliyada iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 06/01/2025 |
| 17. | Md. Cabdiraxmaan Xassan Nuux Furre | Wasiirka Wasaarada Ganacsiga iyo Dalxiiska | 06/01/2025 |
| 18. | Md. Cabdilaahi Daahir Jaamac | Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta | 06/01/2025 |
| 19. | Md. Xuseen Axmed Caydiid | Wasiirka Wasaarada Hawlaha Guud, dhulka iyo Guryaynta | 06/01/2025 |
| 20. | Md. Cabdale Maxamed Carab (Cabdle Sandheere) | Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Amniga | 06/01/2025 |
| 21. | Md. Xassan Axmed Ducaale (Maclin) | Wasiir Wasaarada Horumarinta Dawladaha Hoose iyo Magaalooyinka | 06/01/2025 |
| 22. | Md. Yoonis Axmed Yoonis Muxummad | Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda | 07/01/2025 |
| 23. | Md. Cali Jaamac Faarax (Buureed) | Wasiirka W. Kalluumaysiga iyo Kh. Badda | 07/01/2025 |
| 24. | Md. Eng Axmed Jaamac Barre Rooble | Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macadanta | 07/01/2025 |
| 25. | Md. Abubakar C/raxmaan Good Wacays | Wasiirka Wasaaradda Biyaha | 07/01/2025 |
| 26. | Md. Maxamuud Cige Yuusuf | Wasiirka W/ Horumarinta Beeraha | 07/01/2025 |
| 27. | Md. Fu'aad Axmed Nuux Nuur | Wasiirka Duulista & Horumarinta Madaaradda | 07/01/2025 |
| 28. | Md. Axmed Aw-daahir Xaaji Xasan | Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha & Arr, Dastuurka | 07/01/2025 |
| 29. | Md. Saleebaan Ducaale Xaaji Jaamac | Wasiirka Wasaaradda Dib u-dejitna Arrimaha Bani-aadamnimada | 07/01/2025 |
| 30. | Md. Cumar Shucayb Max'ed Cabsiiye | Wasiirka W/Xannaanada iyo Horumarinta Reer Miyiga | 07/01/2025 |
| 31. | Md. Muxumed Yuusuf Ibraahim Faacuul | Wasiiru-dawlaha W. Waxbarashada, Barbaarinta iyo Sayniska | 07/01/2025 |
| 32. | Md. C/rashiid Max'ed Axmed (Magaalo) | Wasiiru-dawlaha W/ Amniga Gudaha | 07/01/2025 |
| 33. | Md. Ismaaciil Mawliid C/laahi Xasan | Wasiiru-dawalaha W/Maaliyadda iyo Horumaritna Dhaqaalaha | 07/01/2025 |
| 34. | Md. Mukhtaar Xaaji Muxummad Faarax | Wasiir-ku-xigeenka W/Horumarinta Beeraha | 07/01/2025 |
| 35. | Md. Axmed Cumar X. C/laahi (Xamarji) | Wasiir ku-xigeenka W/Dawlahadaha hoose iyo Horumarinta Magaalooyinka | 07/01/2025 |
| 36. | Md. Muuse Askar Guuleed Jaamac | Wasiir ku-xigeenka W/Warfaafinta, Dhaqaanka iyo Wacyigelinta | 07/01/2025 |
| 37. | Marwo. Samsam Max'ed Saalax Yacniile | Wasiir ku-xigeenka W/Horumarinta Caafimaadka | 07/01/2025 |
| 38. | Md. Jamaal Jaamac Xaamuud Dhunkaal | Wasiir Ku-xigeenka W/Diinta & Awqaafta | 07/01/2025 |
| 39. | Md. Cali Axmed Cabdi Cantar | Wasiir ku-xigeenka W/Xannaanada Xoolaha & Horumarinta reer Miyiga | 07/01/2025 |
| 40. | Md. Yuusuf Nuux Yuusuf (Tadhase) | Wasiir Ku-xigeenka W/Dhalinyarada &Ciyaaraha | 07/01/2025 |
| 41. | Md. Maxamed Muuse X. Cabdi (Galaydh) | Wasiir ku-Xigeenka W/Shaqada, Arrimaha Bulshada & Qoyska | 07/01/2025 |
| 42. | Md. Sharmaake Cabdi Muuse Maxamed | Wasiir Ku-xigeenka W/Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda | 07/01/2025 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 43. | Md. C/raxmaan Shide Bile Dharaar | Wasiir ku-xigeenka W/Dib u-dejinta iyo Arrimaha Bani aadamnimada | 07/01/2025 |
| 44. | Md. Yuusuf Kayse C/laahi Aadan | Wasiir ku-xigeenka W/Duulista, Hawada iyo Horumarinta Madaarada | 07/01/2025 |
| 45. | Md. Dr Maxamed Aw Daahir Ibraahin | Wasiir ku-xigeenka W/Deegaanka & Isbeddelka Cimilada. | 07/01/2025 |
| 46. | Md. Maxamuud Cilmi Xuseen (Huuno) | Wasiir ku-xigeenka W/Maalgashiga & Wershadaha | 07/01/2025 |
| 47. | Md. Jawhar Siciid Warsame | Wasiir ku-xigeen W/Ganacisga iyo Dalxiiska | 07/01/2025 |
| 48. | Md. Maaliki Cabdi Xasan Xirsi | Wasiir Ku-xigeenka W/Isgaadhssiinta iyo Tiknoolajiyadda | 07/01/2025 |
| 49. | Md. Maxamed Muuse Bucul Bookh | Wasiir Ku-xigeenka W/Xildhiidhka Golayaasha iyo Arrimaha Dastuurka | 07/01/2025 |
| 50. | Md. Maxamed Cabdimaalik Axmed | Wasiir Ku-xigeenka W/Gaadiidka & Horumaritna Jidadka | 07/01/2025 |

## Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2025ka

**18 January 2025** ayaa Xukuumada Cusub ee Xilka la wareegtay bil ka hor waxay Golaha Wakiillada u soo gudbisay Odoroska Miisaaniyad sannadeedka 2025ka, Miisaaniyadaas oo ka kooban Guud ahaan **3,894,462,279,363 SLSH.**



Waxaana Golaha Miisaaniyadaas warbixin ka siiyay Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Dhaqaalaha **Md. Cabdilaahi Xasan Aadan.** Intaas ka dib, wuxuu Gudoomiyuhu Mudanayaasha ku wargaliyay in sida habraacu yahay Miisaaniyada lagu wareejinayo Gudiga Dhaqaalaha iyo Maaliyada si ay waajibaadkeeda uga soo gudato warbixina Golaha uga soo siiso, iyadoo wakhtiga oo cidhiidhi ah iyo Miisaaniayda oo raagtay darteed wuxuu Gudiga faray inay sida ugu deg-dega badan ay Golaha ugu soo celiso.

Gudiga Dhaqaaluhu waxay Golaha dib ugu soo celisay warbixina ka siisay 25 January 2025, Ugu dambeyn, wuxuu Goluhu **fadhigaas** cod gacantaaga ku meel-mariyay Ansixinta **Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2025ka.**

## Ansixinta Xisaab Xidhka Miisaaniyada Sannadkii 2022kii.

**11 January 2025** Gudiga Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Golaha Wakiilladu waxay Golaha ka jeedisay isla markaana Mudanayaasha loo qaybiyay Warbixin balaadh oo ay kaga hadlayso Xisaab Xidhka Miisaaniyada Sannadkii 2022kii oo ay Gudigu gacanta ku haysay, taas oo muddo gudigu ka shaqaysay iyado kulamo kala duwan la yeelatahay hay'addaha iyo masuuliyiin kala duwan, isla markaana socdaalo, kormeero iyo xaqiiqo raadin ku tagtay goobo badan oo mashaariicdii Miisaaniyadaasi ku jiray laga hirgaliyay.

Gudigu waxay kulan-dadwayne (public hearing) u soo qabatay Xisaab Xidhka si ay bulshada ula wadaagto caqabadaha taagan ee ku saabsan xidhadha oo wakhtigoodii dib uga dhaca. Ugu dambeyn Gudigu waxa xisaab xidhkaas ka soo diyaarisay warbixin balaadhan oo xambaarsan nuxurkeeda baadhitaan, caqabadaha jira iyo soo jeedimo ay golewaynaha la wadaagtay, wuxuuna Goluhu 11 January Ansixiyay Xisaab Xidhkaas 2022kii oo lagu lifaaqay soo jeedihimii Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Golaha.

## Mashaariicda Sharci (Xeerar) ee Golaha horyaala

### B. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| N | Magaca Xeerka | Cidda gacanta ku haysa |
|---|---|---|
| 1. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Wakaalada Madbacada Qaranka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 2. | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 3. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Duulista Hawada | Gudidda Hawlaha Guud |
| 4. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Kaydka Haamaha Shidaalka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 5. | Xeerka Amniga Technology-yada iyo Dambiyada Technology-yada Casriga ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 6. | Xeerka Illaalinta Xogta Electronics-ka ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 7. | Wax ka badelka Xeerka Xanaanada Xoolaha | Gudidda Deegaanka |
| 8. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wada-marita Gaadiidka | Gudidda Hawlaha Guud |
| 9. | Wax ka badelka Xeerka Saxaafada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 10. | Wax ka badelka Xeerka Ciqaabta Guud | Gud. Garsoorka, Cadaalada & X. Insaanka |
| 11. | Wax ka badelka Xeerka Jinsiyada | Gudidda Arr. Gudaha & Nabadgalyada |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliyada | Golewaynaha |
| 2. | Xeerka Rahnka Hantida Ma guurtada ah | Golewaynaha |
| 3. | Xeerka Sharciga Dakhliga Shidaalka | Golewaynaha |

### J. XeerarkaGuurtida ku maqan

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xeebaha | Golaha Guurtida |

### X. Xeerarka Madaxweynuhu soo celiyay

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Dakhliga iyo Cashuuraha Guud | Madaxwaynuhu soo celiyay |

## GO'AAMADII GOLUHU GAADHAY

Intii lagu jiray Kal-fadhigii 10[aad] Goluhu wuxuu sameeyay go'aano ansixineed oo gacan taag **56 eer**, go'aanadaas oo uu ku ansixiyay Xeerar, masuuliyiin qaran, Mooshino, qaraaro iyo ajanadayaal. **56** kaas go'aana waxay kala ahaayeen: -

| 1. | Nooca Go'aanka | Tariikhda | U gudbay |
|---|---|---|---|
| **2.** | Go'aanka Ansixinta Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada | 21/12/2024 | Madaxweynaha |
| **3.** | Go'aanka Ansixinta Xeerka Garyaqaanka Guud ee Xukuumada | 22/12/2024 | Madaxweynaha |
| 4. | Co'aankii Ansixinta Ajandaha Kal-fadhiga 10[aad] | 24/11/2024 | Shir-gudoonka |
| 5. | Co'aankii Ansixinta C/raxmaan Cismaan Cabdulle Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 07/12/2024 | Madaxweynaha |
| 6. | Co'aankii Ansixinta Siciid Axmad C/kariim Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 07/12/2024 | Madaxweynaha |
| 7. | Go'aanka Anxinta Md. Axmad Yaasiin Sh. Cali Ayaanle Wasiirka W. Warfaafinta iyo Wacyigalinta | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 8. | Go'aanka Anxinta Md. Cabdiraxaam Daahir Aadan Wasaaradda Arr. Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 9. | Md. Maxamed Yuusuf Cali (Ikacase) Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga iyo Difaaca | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 10. | Go'aanka Anxinta Md. Khadar Xuseen Cabdi Wasiirka Wasaarada Madaxtooyada | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 11. | Go'aanka Anxinta Md. Ismaaciil Yuusuf Ducaale Wasiirka Wasaarada Waxbarashada, Barbaarinta iyo Sayniska | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 12. | Go'aanka Anxinta Dr Xuseen Bashiir Xirsi Wasiirka Wasaarada Horumarinta Caafimaadka | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 13. | Go'aanka Anxinta Mrwo. Milgo Maxamed Cilmi Wasiirka Wasaarada Arrimaha Bulshada iyo Qoyska | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 14. | Go'aanka Anxinta Md. Axmed Maxamed Faarax Coofle Wasiirka Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 15. | Go'aanka Anxinta Md. Jamaal Maxamed Jaamac Wasiirka W. Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyada | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 16. | Go'aanka Anxinta Md. Cismaan Ibraahin (Af-gaab) Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo horumarinta | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 17. | Go'aanka Anxinta Mrwo Kaltuun Sh. Xassan Cabdi Madar Wasiirka W, Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 18. | Go'aanka Anxinta Md. Siciid Maxamed Buraale Wasiirka Wasaarada Maalgashiga iyo Warshadaha | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 19. | Go'aanka Anxinta Md. Cabdilaahi Cismaan Jaamac (Geeljire) Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo Isbadelka Cimilada | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 20. | Go'aanka Anxinta Md. Cabdilaahi Xassan Aadan Cawaale i Wasiirka Wasaarada Maaliyada iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 21. | Go'aanka Anxinta Md. Cabdiraxmaan Xassan Nuux Furre i Wasiirka Wasaarada Ganacsiga iyo Dalxiiska | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 22. | Go'aanka Anxinta Md. Cabdilaahi Daahir Jaamac in ahaado Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta | 06/01/2025 | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 23. | Go'aanka Anxinta Md. Xuseen Axmed Caydiid asiirka Wasaarada Hawlaha Guud, dhulka iyo Guryaynta | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 24. | Go'aanka Anxinta Md. Cabdale Maxamed Carab (Cabdle Sandheere) in ahaado Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Amniga | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 25. | Go'aanka Anxinta Md. Xassan Axmed Ducaale (Maclin) Wasiir Wasaarada Horumarinta Dawladaha Hoose iyo Magaalooyinka | 06/01/2025 | Madaxweynaha |
| 26. | Co'aankii Ansixinta Md. Yoonis Axmed Yoonis Muxummad Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 27. | Co'aankii Ansixinta Md. Cali Jaamac Faarax (Buureed) Wasiirka W. Kalluumaysiga iyo Kh. Badda | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 28. | Co'aankii Ansixinta Md. Eng Axmed Jaamac Barre Rooble Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macadanta | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 29. | Co'aankii Ansixinta Md. Abubakar C/raxmaan Good Wacays Wasiirka Wasaaradda Biyaha | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 30. | Co'aankii Ansixinta Md. Maxamuud Cige Yuusuf Wasiirka W/ Horumarinta Beeraha | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 31. | Co'aankii Ansixinta Md. Fu'aad Axmed Nuux Nuur Wasiirka Duulista & Horumarinta Madaaradda | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 32. | Co'aankii Ansixinta Md. Axmed Aw-daahir Xaaji Xasan Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha & Arr, Dastuurka | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 33. | Co'aankii Ansixinta Md. Saleebaan Ducaale Xaaji Jaamac Wasiirka Wasaaradda Dib u-dejitna Arrimaha Bani-aadamnimada | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 34. | Co'aankii Ansixinta Md. Cumar Shucayb Max'ed Cabsiiye Wasiirka W/Xannaanada iyo Horumarinta Reer Miyiga | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 35. | Co'aankii Ansixinta Md. Muxumed Yuusuf Ibraahim Faacuul Wasiiru-dawlaha W. Waxbarashada, Barbaarinta iyo Sayniska | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 36. | Co'aankii Ansixinta Md. C/rashiid Max'ed Axmed (Magaalo) Wasiiru-dawlaha W/ Amniga Gudaha | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 37. | Co'aankii Ansixinta Md. Ismaaciil Mawliid C/laahi Xasan Wasiiru-dawalaha W/Maaliyadda iyo Horumaritna Dhaqaalaha | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 38. | Co'aankii Ansixinta Md. Mukhtaar Xaaji Muxummad Faarax Wasiir-ku-xigeenka W/Horumarinta Beeraha | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 39. | Go'aanki Anxinta Md. Axmed Cumar X. C/laahi (Xamarji) Wasiir ku-xigeenka W/Dawlahadaha hoose iyo Horumarinta Magaalooyinka | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 40. | Go'aanki Anxinta Md. Muuse Askar Guuleed Jaamac Wasiir ku-xigeenka W/Warfaafinta, Dhaqaanka iyo Wacyigelinta | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 41. | Go'aanki Anxinta Marwo. Samsam Max'ed Saalax Yacniile Wasiir ku-xigeenka W/Horumarinta Caafimaadka | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 42. | Go'aanki Anxinta Md. Jamaal Jaamac Xaamuud Dhunkaal Wasiir Ku-xigeenka W/Diinta & Awqaafta | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 43. | Go'aanki Anxinta Md. Cali Axmed Cabdi Cantar | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 44. | Go'aanki Anxinta Md. Yuusuf Nuux Yuusuf (Tadhase) Wasiir Ku-xigeenka W/Dhalinyarada &Ciyaaraha | 07/01/2025 | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 45. | Go'aanki Anxinta Md. Maxamed Muuse X. Cabdi (Galaydh) Wasiir ku-Xigeenka W/Shaqada, Arrimaha Bulshada & Qoyska | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 46. | Go'aanki Anxinta Md. Sharmaake Cabdi Muuse Maxamed Wasiir Ku-xigeenka W/Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 47. | Go'aanki Anxinta Md. C/raxmaan Shide Bile Dharaar Wasiir ku-xigeenka W/Dib u-dejinta iyo Arrimaha Bani aadamnimada | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 48. | Go'aanki Anxinta Md. Yuusuf Kayse C/laahi Aadan Wasiir ku-xigeenka W/Duulista, Hawada iyo Horumarinta Madaarada | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 49. | Go'aanki Anxinta Md. Dr Maxamed Aw Daahir Ibraahin Wasiir ku-xigeenka W/Deegaanka & Isbeddelka Cimilada. | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 50. | Go'aanki Anxinta Md. Maxamuud Cilmi Xuseen (Huuno) Wasiir ku-xigeenka W/Maalgashiga & Wershadaha | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 51. | Go'aanki Anxinta Md. Jawhar Siciid Warsame Wasiir ku-xigeenka W/Ganacsiga iyo Dalxiiska | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 52. | Go'aanki Anxinta Md. Maaliki Cabdi Xasan Xirsi Wasiir Ku-xigeenka W/Isgaadhssiinta iyo Tiknoolajiyadda | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 53. | Go'aanki Anxinta Md. Maxamed Muuse Bucul Bookh Wasiir Ku-xigeenka W/Xildhiidhka Golayaasha iyo Arrimaha Dastuurka | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 54. | Go'aanki Anxinta Md. Maxamed Cabdimaalik Axmed Wasiir Ku-xigeenka W/Gaadiidka & Horumaritna Jidadka | 07/01/2025 | Madaxweynaha |
| 55. | Go'aankii Anxinta Xisaab Xidhka Sannadkii 2022kii | 11/01/2025 | Madaxweynaha |
| 56. | Go'aankii Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qarabnka Sannadka 2025ka | 25/01/2025 | Madaxweynaha |

## WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA 2024KII

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban.

## Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Guddida joogtada iyo Ashaxu iyada oo Gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 54aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, Waxa ay Guddidu kal-fadhigii ee 10aad ay qabatay shaqooyin badan waxa ay kulamo la yeelatay Masuuliyiin kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban waxa uu ahaa sidan:-

### Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran

- **02 March 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka.**
- **25 February 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Xisaabiyaha Guud ee Qaranka Md. Axmad Daa'uud Geedi.**
- **24 February 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Wasiirka Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo H. R. Miyiga Md. Cumar Shucayb Maxamed**
- **22 February 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Amniga Md. Cabdale Maxamed Carab.**
- **10 February 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo Is-badelka Cimilada Md. C/laahi Geeljire**

### Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole-waynaha uga soo talo-bixisay

- **04 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Cabdilaahi Cismaan Jaamac (Geeljire) Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo Isbadelka Cimilada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **04 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md Dr Maxamed Aw Daahir Ibraahin Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Deegaanka iyo Isbadelka Cimilada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo

## Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanka, Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamartu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 58aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii ee 10aad waxay kala ahaayeen sidan:-

## Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole-waynaha uga soo talo-bixisay

- **06 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Maxamuud Cige Yuusuf Wasiirka Wasaarada Beeraha** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **06 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Cali Jaamac Faarax (Buureed) Wasiirka Wasaarada Kalluumaysiga iyo Horumarinta Bada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo
- **06 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Abuubakar C/raxmaan Good Wasiirka Wasaarada Biyaha** xilkaas Goluhu ugu ansixiyo
- **06 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Axmad Jaamac Faarax Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamareta** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo
- **06 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Cumar Shucayb Maxamed Wasiirka Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer Miyiga Bada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo
- **06 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Cali Axmad Cabdi Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer Miyiga Bada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo
- **07 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Mukhtaar X. Maxamuud Faarax Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Beeraha** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo
- **07 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo tallo-bixisay **Md. Sharmaarke Cabdi Muuse Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Kalluumaysiga** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

## Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka

Guddida Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Goluhu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 60aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii ee 10aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **03 December 2024** Waxay Gudiddu kulan shaqo la qaadatay Duqa Caasimada ahna, Gudoomiyaha G/deegaanka Caasimada Hargeysa Md. C/kariim Axmad Mooge oo weheliyaan qaar ka mid ah Mudanyaasha G/deegaanka
- **06 January 2025** Waxay Guddidu kulan iskugu jiray Xogwaraysi iyo Ansixin la yeelatay Wasiirka iyo Wasiir ku xigeenka Wasaradda Duulista Hawada iyo H. Madaarada Jsl ee uu Madaxwaynuhu soo magacaabay.

### Kormeeridii & Safaradii ay Gudiddu samaysay

- **03 December 2024** Waxay Gudiddu kormeer shaqo la qaadatay ku tagtay Dawlada Hoose ee Caasimada iyadoo halkaas kula kulantay Duqa Caasimada ahn, Gudoomiyaha G/deegaanka Caasimada Hargeysa Md. C/kariim Axmad Mooge oo weheliyaan qaar ka mid ah Mudanyaasha G/deegaanka, intaas ka dib, guddidu waxay soo kormeertay mashaariic ay fulisay Dawlada Hoose oo ku jiray Miisaaniyadii 2022kii.
- **01 December 2024** Guddida ayaa kormeer iyo u xog-ogaal u noqosho ah sameeyay qaybo ka mid ah Hay'addaha Dawladda sida Wasaarada Gaadiidka iyo H. Jidadka, Ujeeddada kormeerkaas oo ahaa Ilaalinta Hantida Dawladda xilligan kala guurka ah iyo dabagalka Xisaab xidhka Dawladda ee Miisaaniyada sannadkii 2022-ka oo Guddidu gacanta ku hayso.
- **26-29 November 2024** Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay safar iyo kormeer qaatay 3 maalmood ku tagtay **Gobolka Saaxil Magaalo madaxdiisa Bebera,** Safarkaas oo ujeedadiisu xog-ogaal u noqoshada Mashaariicdii ku jirtay Miisaaniyadii Sannadkii 2022kii madaama ay Gudiddu gacanta ku haysay Xisaab Xidhka Miisaaniyadii 2022kii, sidoo kale ay xog-ogaal ugu noqoto Hantida Qaranka ee guurtada iyo ma guurtada madaama lagu jiray xaalad kala guur oo xukuumadii cusub la doortay.

## Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 59aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii ee 10aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **07 January 2025** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay **Wasiirka iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaaraada Dib U-dejinta iyo Bani'aadnimada Md. Saleebaan Ducaale X. Jaamac iyo Md. Maxamed C/raxman Shide**
- **07 January 2025** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Wasiirka iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaaraada Xidhiidhka Golayaasha iyo Dastuurka **Md. Axmad Awdaahir X. Xasan iyo Md. Maxamed Muuse Bucul Bookh**
- **06 January 2025** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Cadaalada **Mudane Yoonis Axmad Yoonis**
- **05 January 2025** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada **Mudane Khadar Xuseen Aadam**

### Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

- **07 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Wasiirka iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaaraada Dib U-dejinta iyo Bani'aadnimada Md. Saleebaan Ducaale X. Jaamac iyo Md. Maxamed C/raxman Shide**
- **07 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Wasiirka iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaaraada Xidhiidhka Golayaasha iyo Dastuurka Md.**

Axmad Awdaahir X. Xasan iyo Md. Maxamed Muuse Bucul Bookh**

- **07 December 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. C/raxman Cismaan Cabdule Xubin Gudidd Xuquuqal Insaanka ah** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **07 December 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Siciid Axmad C/kariim Xubin Gudidd Xuquuqal Insaanka ah** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

## Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga

Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadu iyo Ganacsiga iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 61$^{aad}$ ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii ee 10aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka 2025

- **02 January,2025 waxay** Kulan Xog-warran ah la yeelatay **Wasiirka W. Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha Md. Cabdilaahi Xasan Aadan.**
- **03 January 2025 waxay** Kulan Xog-warran ah la yeelatay **Wasiiru-dowlaha W. Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha Md. Ismaaciil Mowliid Cabdilaahi**

### Xeerarka iyo Miisaaniyada ay Golewaynaha u soo gudbisay

- **25 January 2025** waxay Gudiddu Golewaynaha u gudbisay Warbixinteedii **Misaaniyadda Qaranka 2025**

## Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoysku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 63$^{aad}$ ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii ee 10aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **05 January 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Warfaafinta iyo Wacyigalinta Md. Axmadyaasiiin Sh. Cali Ayaanle
- **04 January 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta Md.  Md. C/laahi Daahir Jaamac iyo Wasiir ku-xigeena Wasaaradaas Md. Jamaal Jaamac Xaamud.

## Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 62aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **09 April 2025** waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Duulista iyo Horumarinta Madaarada **Mudane Fu'aad Axamd Nuux**

### Mashaariicda Sharci ee Golewaynaha u soo gudbisay

- **01 December 2024** waxay Golewaynaha u soo gudbisay warbixina ka siisay **Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah**

### Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

- **04 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Jamaal Maxamed Jaamac Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Tiknoolojiyada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **05 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Cismaan Ibraahim Af-gaab Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo H. Jidadka** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **05 January 2025** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Fu'aad Axmad Nuux Wasiirka Wasaarada Duulista iyo Horumarinta Madaarada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

## Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 55aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **15- January- 2025,** Guddidu waxay kulan la qaadatay **Xafiiska UK ee Somaliland,** kulankaas oo lagaga hadlay sidii gacan looga gaysan lahaa Xeerarka ay guddidu gacanta ku hayso iyo Qorshaha ay labada Xafiis ku wada shaqayn lahaayeen.
- **13- January- 2025, Waxay** Guddidu kulan xog-waraysi ah ugu yeedhay Wasiirka Wasaaaradda Arimaha Gudaha & Amniga **Mudane Cabdalle Maxamed Carab "Sandheere",** Kulankaas oo Wasiirku Guddida uga xog-waramay Xaalada Amniga guud ee Dalka iyo Xaaladaha Amni ee Gobaladda Barriga ka Aloosan.

## Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole-waynaha uga soo talo-bixisay

- **06 Jan 2025** Guddidu waxay Gole-waynaha u soo gudbisay kana codsatay **Md. Xasan Axmed Ducaale "X. Macalin",** oo Madaxwaynuhu usoo magacaabay **Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose & Horumarinta Magaalooyinka**, in si xilkaas ah Goluhu ugu ansixiyo.
- **06 Jan 2025** Guddidu waxay Gole-waynaha u soo gudbisay kana codsatay **Md. Axmed Cumar X. Cabdilaahi "Xamarji"** oo Madaxwaynuhu usoo magacaabay **Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Dawladaha Hoose & Horumarinta Magaalooyinka**, in si xilkaas ah Goluhu ugu ansixiyo.
- **05 Jan 2025** Guddidu waxay Gole-waynaha u soo gudbisay kana codsatay **Md. Cabdalle Maxamed Carab "Sandheere"** oo Madaxwaynuhu usoo magacaabay **Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha & Amniga**, in si xilkaas ah Goluhu ugu ansixiyo.
- **05 Jan 2025** Guddidu waxay Gole-waynaha u soo gudbisay kana codsatay **Md. Cabdirashiid Maxamed Axmed "Magaalo"** oo Madaxwaynuhu usoo magacaabay **Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Arimaha Gudaha & Amniga**, in si xilkaas ah Goluhu ugu ansixiyo.
- **04 Jan 2025** Guddidu waxay Golewaynaha u soo gudbisay kana codsatay **Md. Maxamed Yuusuf Cali Axmed** oo Madaxwaynuhu usoo magacaabay **Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhiga**, in si xilkaas ah Goluhu ugu ansixiyo.

# Gudidda Arrimaha Bulshada

Guddida Arrimaha Bulshada iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 64[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii ee 10aad waxay kala ahaayeen sidan:-

## Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **22 February 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Hay'adda GIZ**
- **17 February 2025** waxay Gudiddu kulan hawleed la yeelatay KomishankaTacliinta Sare ee Somaliland.
- **17 February 2025** Gudida oo ay weheliso Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka Marwo Samsam Maxamed ayaa maanta kulan la yeeshay madaxa xafiiska horumarinta UK ee Somaliland
- **03 February 2025** waxay Gudiddu kulan hawleed la yeelatay Agaasimaha Guud ee Wasaarada Arrimaha Bulshada iyo Qoyska
- **19 January 2025** waxay Gudiddu kulan hawleed la yeelatay Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Caafimaadka iyo saraakiil ka tirsan Wasaaradaas.
- **28 December 2024** waxay Gudiddu kulan hawleed la yeelatay Ururada Saxaafada Somaliland, kulankaas oo ujeedadiisu ahayd geedi socodka naaqisha wax ka badelka Xeerka Saxaafada oo Gudiddu gacanta ku haysay.

## Kormeeradii Gudiddu samaysay

- **27 March 2025** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiillada oo kormeer shaqo ku jooga Gobolka Tog-dheer ayaa waxay kormeer shaqo ku tageen **Dhakhtarka weyn ee Magaalada Burco**
- **26 March 2025** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiillada oo kormeer shaqo ku jooga Gobolka Saaxil ayaa waxay kormeer shaqo ku tageen **Dhakhtarka weyn ee Magaalada Berbera** iyo **Dakhtarka wayn ee Magaalada Shiikh.**
- **24 March 2025** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiillada oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Guddida Mudane Axmed Jaamac Saalax (Axmed-khalif) iyo laba xubnood oo ka tirsan Guddida ayaa waxa ay maanta kormeer ku soo Mareen Dhakhtarka weyn ee Magaalada Hargeisa iyo dhakhtar Gaarka loo leeyahay ee Kaah.

## Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **25 March 2025** waxay Gudidda Arrimaha Bulshada oo kormeer ku jooga Gobolka Tog-dheer gaar ahaan Magaalo madaxdiisa Burco ayaa kulan dadwayne ugu qabtay Magaaladaas qabyo-qoraalka Mashruuc Sharciga Caafimaadka oo Gudiddu gacanta ku hayso. Iyadoo sidoo kale 12 June ayay Magaalooyinka Boorama iyo Gabilay ku qabatay kulamo dadweyne oo ku saabsan Xeerka Caafimaadka.
- **25 March 2025** waxay Gudidda Arrimaha Bulshada oo weheliyaan Hay'adda Caalamiga ah ee Action Aid ayaa kulan dadwayne u qabtay qabyo-qoraalka Mashruuc Sharciga Mamnuucida Gudidniinka
- **28 December 2024** waxay Gudidda Arrimaha Bulshadu daah-furtay Qorshaheeda iyo Ajandaha Xeerar u qorshaysna inay ka shaqayso.

## Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

- **04 Januari 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Ismaaciil Yuusuf Ducaale Wasiirka Wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **04 Januari 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Dr. Xuseen Bashiir Xirsi Wasiirka Wasaarada Caafimaadka** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **04 Januari 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Marwo. Milgo Maxamed Cilmi Wasiirka Wasaarada Arrimaha Busladha iyo Qoyska** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **04 Januari 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Axmad Maxamed Goofle Wasiirka Wasaarada Ciyaaraha iyo Dhalinyarada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

## AQOON-KORODHSIYADII IYO TABABARADII

- **21 January** Aqoon-is-weydaarsi ku saabsan qorista, samaynta iyo dejinta shuruucda iyo Miisaaniyada qaranka (Legislative Drafting Standards and Comparative Study of National Budget) ayaa loo qabtay labada Gole Baarlamaan ee Somaliland (Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida), waxaan aqoon is-waydaarsigan soo qaban qaabisay hay'adda Jarmalka ah ee Max Planck Foundation oo Golayaasha la shaqaysa.

- **14 January** Gudoomiyaha Golaha Wakiillada ayaa Daah-furay Aqoon-is-weydaarsi Ku saabsan Madax-bannaanida Garsoorka iyo Qaabdhismeedkiisa, Xildhibaanada Labada Gole ee Baarlamaanka (Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida). Aqoon-is-waydaarsigan ayaa ujeedadiisu ahay sidii laba Gole uga qaybqaadan lahaayeen dardargalinta Madaxbaanida Garsoorka, ayaa waxa uu ka qabsoomay Hotel-ka Casood ee Magaalaha Hargeisa, wuxuuna socday muddo laba cisho ah.

## KULAMO WUFUUDAHA IYO MADAXDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH

- **Kulan Soo dhowayn oo Gudoomiyuhu ku qaabilay Wafti Ka socday Itoobiya**


**09 February 2025** Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Mudane Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon) oo ay weheliyaan Gudoomiye ku-xigeenka 1aad Mudane Siciid Mire Faarax (Giire) iyo Gudoomiye ku Xigeenka 2aad Mudane Cali Xaamud Jibriil ayaa Golaha ku soo dhaweeyay Wafti ka socday Dawlada Fadaraalka Ethiopia Gaar ahaan Ismaamulka Diridhaba kanna koobanaa Af-hayeenka Baarlamaanka Diridhaba, Xildhibaano heer Fadaraal, Xidhibaanada Ismaamulka Diridhaba iyo Wasiiro ka tirsan Ismaamulka Diridhaba.

## SAFARADII DIBADA LOO BAXAY

- **Waftigii Dalka Djabuuti ee uu hogaaminayay Gudoomiye ku-xigeen 2aad**

**02 December 2024** Waftiga Uu Hogaaminayo Gudoomiye ku-igeenka 2aad ee Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland **Md. Cali Xaamud Jibriil,** Kuna Weheliyaan Xildhibaan Cumar Jaamac Faarax, Cismaan Afgaab iyo Cabdilaaahi Daahir Cukuse. Shir-gudoonka Barlamaanka Jamhuuriyadda Djibouti oo uu Hogaaminayo Gudoomiyaha Aqalka Barlamaanka **Dileyta Maxamed Dileyta** Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Baarlamaanka **Marwo Safiya** ayaa si heer sare ah ugu soo Dhaweeyay dalka Djibouti.

Dhanka kale, waxay labada dhinac kawada hadleen Xidhiidhka qotoda dheer ee ka dhaexeeya labada dal, ugu danbeyn kulanka ayaa ku soo dhamaadey Isfahan iyo Xoojinta Xidhiidhka labada Waddan.





*Gudoomiye ku-xigeenka 2aad iyo Xidhibaano la kulmahy Madaxweyne Ismacil Cumar Geele*

Sidoo kale, Waftigan uu hogaaminayo Gudoomiye Cali Xaamud waxay la kulmeen Madaxweynaha Jamhuuriyadda Djibouti **Mudane Ismaaciil Cumer Geele,** Madaxweynaha ayaa Wafiga ku qaabiley Qasriga Madaxtooyada Dalka Djibouti, kulanka ayaa lagu gorfeeyey xoojinta iyo Xidhiidhka qotada dheer ee ka dhexeeya labada Dal. Ugu danbeyn Gudoomiye Cali Xaamud ayaa Madaxweynaha uga mahadnaqey soo dhaweynta uu u sameeyey waftiga uu hogaaminaayo, kulanka ayaa isna ku soo dhamaadey isfahan iyo wadajirka labada Dal.

- **Safarkii Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Dalka Djabuti.**

**December 2, 2024** Waftiga Uu Hogaaminayo Gudoomiye ku-igeenka 2aad ee Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland **Mudane Cali Xaamud Jibriil**, Kuna Weheliyaan Xildhibaan Cumar Jaamac Faarax, Cismaan Afgaab iyo Cabdilaaahi Daahir Cukuse, Ayaa Shir-gudoonka Barlamaanka Jamhuuriyadda Djibouti oo uu Hogaaminayo Gudoomiyaha Aqalka Barlamaanka Dileyta Maxamed Dileyta Gudoomiye ku xigeenka 1aad ee Baarlamaanka Marwo Safiya, ayaa si heer sare ah ugu soo Dhaweeyay dalka Djibouti.

Dhanka kale waxay labada dhinac kawada hadleen Xidhiidhka qotoda dheer ee ka dhaexeeya labada dal, ugu danbeyn kulanka ayaa kusoo dhamaadey Isfahan iyo Xoojinta Xidhiidhka labada Waddan.

Dhanka kale waxay labada dhinac kawada hadleen Xidhiidhka qotoda dheer ee ka dhaexeeya labada dal, ugu danbeyn kulanka ayaa kusoo dhamaadey Isfahan iyo Xoojinta Xidhiidhka labada Waddan.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**